



suuxinta laf- dhabartaada

Warqad-qoraaleedkan wuxuu sharaxaad ka bixinayaa waxa aad filaneysid marka aad leedahay qalliinka suuxinta laf-dhabarta.

Waxaa qoray dhaqaatiirta suuxinta, bukaanada, iyo wakiillada bukaanada, oo u shaqeynaaya wadajir.

Hordhac

Warqad-qoraaleedkan wuxuu sharaxaad ka bixinayaa:

- **Waxa** suuxinta laf-dhabarta ay tahay
- **Sida** ay u shaqeyso
- **Sababta** aad uga faa'iidayso karto inaad qalliinkaaga u qaadato mid.

Waa maxay 'laf-dhabartu'?

Inta badan qalliinada caadi ayay u tahay bukaanda inay yeeshaan suuxdin guud. Sikastaba ha ahaatee, qalliinada qaarka hoose ee jirka, waqtiyada qaarkood waa wax inta badan suurto-gal ah inaad qaadato suuxinta laf-dhabarta taa beddelkeeda.

Tani waa marka dawada suuxinta lagu duro qeebta hoose ee dhabarkaaga (inta udhaxaysa lafaha dhabarkaaga). Tani waxay ka dhigeysaa qaybta hoose ee jirka dareen la'aan (kabuubyo) si aadan u dareemin xanuunka qalliinka oo aad isla markana u soo jeedi karto.

Qaab ahaan, laf-dhabarta waxay raagtaa hal ama laba saacadood. Daawooyinka kale ayaa laga yaabaa isku waqti lagula duro si ay u caawiyaan xanuun joojinta saacado badan ka dib marka dawada suuxinta ay dhamaato

Inta lagu gudo jiro suuxinta laf-dhabarta waxaa laga yaabaa:

- inaad si buuxda u soo jeeddo
- In laguugu suuxiyo - dawooyin kaa dhigaya inaad xasiloonaato, laakiin aadan miir-daboolnaanin.

Qalliinada qaarkood suuxinta laf-dhabarta ayaa sidoo kale la siin karaa kahor suuxinta guud si wixii inta gadaaleeya loo siiyo xanuun joojiye dheeraad ah.


Takhtarka suuxinta wuxuu kaa caawin karaa go'aaminta kuwa kugu habboon adiga.

Qalliinada badan ee qaybta hoose ee jirka ayaa ku habboon suuxinta laf-dhabarta ha lahaadaan ama yaaney lahaanin suuxin guud. Iyada oo ay kuxirantahay caafimaadkaaga shaqsiyeed, waxaa laga yaabaa inay faa iido kuu lahaato adiga qaadashda laf-dhabarta. dhaqtarkaaga suuxinta wuxuu diyaar u yahay inuu kaala hadlo kaana caawiyo inaad go'aan gaarto waxa adiga kugu habboon.

Suuxinta laf-dhabarta waxaa badanaa loo isticmaali karaa kali ahaanteeda ama lala isticmaali karaa suuxinta guud:

- Qalliinka lafaha ee kala goysyada ama lafaha lugta
- Dayactirka sheelada gumaarka, bararka xididdada, qalliinka baabasiirka (Qoormateyda)
- Qalliinka habdhiska dhiig mareenada: qalliinka halbowlayaasha dhiigga ee lugta
- Caafimaadka habdhiska taranka haweenka: dayactirka isku furunka, egidda ilma galeenka iyo qaar ka mid ah qalliinka ilmo galeenka.
- urology: qalliinka qanjirka', qalliinka kaadiheysta, qalliinka xubnaha taranka.

Sidee laf-dhabarka loo sameeyaa?



- Waxaa laga yaabaa in cirbaddaada laf-dhabarta qolka suuxinta ama qolka qalliinka. Waxaad la kulmi doontaa kaaliyaha suuxinta ee qaybta ka ah kooxda ku xanaanayn doonta.

- Dhaqtarkaaga suuxinta wuxuu marka hore adeegsan doonaa cirbad si uu geliyo tuubo dhuuban oo caag ah ('kaanoole') xididka gacantaada. Tani waxay u oggolaaneysaa takhtarka suuxinta inuu ku siiyo dareeraha iyo wax kasta oo daawooyin ah ee laga yaabo inad u baahato.
- Waxaa lagaa caawin doonaa halka saxda ah ee cirbadda laf-dhabarta. Sariir ayad dhinac kaga fariisan doontaa cagahaaga oo gambar hoose saaran ama dhinac ayad u seexan doontaa, xabadkaaga oo jilbahaaga saaran.
- Kooxda suuxinta ayaa kuu sharixi doonta waxa dhacaya, si aad uga warqabto waxa socda.
- Suuxinta maxaliga ah ayaa marka hore lagu duraa si ay u kabuubiyeeyso maqaarka oo ay duritaanka laf-dhabarta uga dhigto dhib la'aan badan. Ilbiriqsiyo jariiracoon doontaa. Takhtarka suuxinta ayaa ku siin doona cirbadda laf-dhabarta waxaadna u baahan doontaa weli in lagu sii duro. Kalkaaliye ama caawiye dareelka-caafimaad ayaa inta badan ku taageeri doona kaana hubin doona xiliga durista.

Sidoo kale waxaa la yaabaa in aad la kulanto la shaqeyayaal suuxin oo ah xirfadlayaal daryeel caafimaad oo aad u tababaran Waxaad ka akhriyi kartaa waxyabo dheeraad ah oo ku saabsan doorkooda iyo kooxda suuxinta degelkeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team

Maxaan dareemi doonaa?

Durista laf-dhabarta badanaa kama xanuun badno dhiig baaridda ama ku xerista kaanoolaha. Waxaa laga yaabaa inay qaadato daqiiqado yar, laakiin waxaa laga yaabaa in ay qadato wax badan haddii dhabarkaaga ama cayilnaan ku qabtay dhibaatooyin.

- Inta lagu gudo jiro duridda waxaa laga yaabaa inaad dareento kaabuubiyo ama xanuun aad u daran mid kamid ah lugahaaga - haddii aad dareento, isku day inaad kusii nagaato, una sheeg suuxiyahaaga.
- Marka cirbaddu dhammaato, waxaa badanaa lagu weydiin doonaa inaad seexato haddii aad fadhisay. Laf dhabartu waxay badanaa bilowdaa inay saameyn yeelato daqiiqado yar gudahood.
- Bilowga, maqaarkaagu wuxuu dareemi doonaa diirimaad, ka dibna kabuubyo taabashada ka dibna waxaad tartiib tartiib u dareemi doontaa lugahaaga oo u cuslaanaayo iyo adkaan badan inad dhaqdhaqaaqiso.
- Marka cirbadda si buuxda u shaqeynayo, ma awoodi doontid inaad lugahaaga kor u qaadatid ama aad ka dareento wax xanuun ah qeybta hoose ee jirka.

Tijaabinta haddii lafdhabarta ay shaqeysay

Dhakhtarkaaaga suuxinta wuxuu isticmaali doonaa tijaabooyin is isku xig xigga si ay u arkaan inay daawada suuxintu si sax ah u shaqeyneyso, taasoo laga yaabo inay ka mid noqdaan:

- Buufinta dareere qabow laguna weydiyo haddii aad dareemeysid qabow
- Ku tirtiridda suuf ama aalad wax lagu baaro maqaarkaaga laguna weydiyo waxa aad dareemi karto
- In lagu weydiyo inaad lugahaaga kor u qaaddo.

Waa muhiim inaad xoogsaarato inta lagu gudajiro tijaabooyinkan si adiga iyo dhakhtarkaaaga suuxinta aad dib ugu habsataan in ay dawada suuxinta shaqeyneyso. Dhakhtarka suuxinta waxaa uu oggolaan doonaa in qalliinka la bilaabo kaliya marka ay ku qanacsanyihiin in dawada suuxinta ay shaqeyneyso.

Inta lagu gudo jiro qalliinka (suuxdinta laf-dhabarta kaligeed)

- Gudaha qolka qalinka, koox dhameystiran oo shaqaale ah ayaa ku daryeeli doonto. Haddii aad soo jeedo, waa ay iskaa bari doonaan qalbigana way kuu dejin doonaan.
- Waxaa lagu jifin doonaa qalliinka. Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaaga suuxinta haddii ay jiraan waxa ku astareex gelinaayo, sida barkin dheeraad ah ama gacmo-saar.
- Waxa laga yaabaa in laguugu siiyo oksijiin aad ku neefsato, af-dabool balaastic ah , khafiif ah, nugul, si loo kor loogu qaado heerarka ogsijiinta dhiiggaag.
- Waad la socon doontaa 'howsha iyo wax qabadka' qolka qalliinka, laakiin waad awoodi doontaa inaad nasato, iyadoo uu dhakhtarkaaaga suuxinta ku daryeelaayo.
- Waxaad awoodi kartaa inaad dhageysato muusig inta qalliinka lagu jiro. Haddii lagu oggolaado, la imow muusigaaga, adoo wato sameecadaha dhegaha. laamaha qaar ayaa bixiya sameecadaha dhagaha ama muusiga ku dhax shida qolka qalliinka.
- Waad la hadli kartaa dhaqtarkaaaga suuxinta iyo kalkaaliyaha suuxinta inta qalliinka lagu jiro.

Haddii aad suuxsantahay inta lagu jiro qalliinka, waad xasilnaani doontaa waxaana laga yaabaa inaad hurdeysnaato. Waxaa laga yaabaa inad ku gama, do qalliinka, ama waxaa laga yaabaa inad soo jeedo inta lagu gudo jiro qaarkood ama dhammaantood.

waxaa laga yaabaa inaad xasuusato qaarkood, qaarna ama dhamaan waqtigaaga qolka qalliinka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dejinta, fadlan fiiri *Waraqadaa Dejinta* oo faahsan taasoo laga heli karo degelkeena:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation

Waxaad wali ubaahan kartaa suuxin guud haddii:

- Dhakhtarkaaga suuxinta uu sameyn karin laf-dhabarta
- Laf-dhabarta aysan sifiican ugu shaqeeyn agagaarka aagga qalliinka
- Haddii uu qalliinka aad u dhib badanyahay ama uu qaato waqti ka dheer inti la filayay.

Qalliinka kadib

- Waxay qaadataa ilaa afar saacadood dareemaha (dareenka) inuu si buuxda u soo noqdo. Waa inaad u sheegtaa shaqaalaha qolka buukaan jifka wax kastoo kusaabsan walwal ama tabashooyin ah oo laga yaabo in aad qabto.
- Marka uu dareenka soo noqonaayo, waxaad caadiyan dareemi doontaa xoogaa jariieaco ah. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad ogaato xoogaa xanuun ah oo qalliinka ah waxaadna weydisan kartaa wax kastoo xanuun baabi'iyey ah oo aad u baahan tahay.
- Waxaa laga yaabaa in aadan cagahaaga ku istaagin marka hore ee ay laf-dhabartu daba dhamaato waxaana laga yaabo inay tahay daciifnimo yar haddii dhiig karkaagu hooseeyo. Fadlan ka codso caawimaad shaqaalaha ku daryeelaayo marka ugu horreysa ee aad sariirta ka kacdo.
- Sida caadiga ah waad cuni kartaa waxna waad cabi kartaa isla markiiba kadib suuxinta laf-dhabarta marka loo eego suuxinta guud


Maxaa laf-dhabarta loo sameeynaayaa?

Fad'iidooyinka laf-dhabarta keligged marka lala barbar-dhigo yeelashada suuxinta guud waxay noqon karaan:

- Halista caabuqqa feedhaha oo yar kadib qalliinka
- Saamayn sambabada iyo neefsashada oo yar
- xanuun baabi`in wanaagsan isla markiiba qalliinka ka dib
- baahida dawooyinka xanuunka baa,bi`i ya ee xoogan oo yar kuwaasoo yeelan kara waxyeellooyin
- xanuun yar iyo matag
- hore u noqosho cabitaanka iyo cunista qalliinka ka dib.

Fahmiddaa halista

Dadku way ku kala duwan yihiin sida ay u tarjumaan ereyada iyo tirooyinka. cabbirkan waxaa loo bixiyaa si uu caawiyo



Dhibaatooyinka halista ah kuma badno suuxinta casriga ah. Qalabka iyo farsamooyinka cusub, heerarka tababarka iyo dawooyin waxtar leh ayaa waxay ka dhigeen nidaam aad u amni badan.

Si aad u fahanto halista kuugu wajahan, waa inaad ogaataa:

- sida ay u badan tahay inay u dhacdo
- sida ay qatar u noqon karto
- sida loo daweyn Karo.

Dhaqtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli kara halisaha kaana caawin kara inaad go'aan ka gaarto waxa ay tahay nooca suuxinta ee adiga kuu wanaagsan.

Waxyeelooyinka iyo dhibaatooyinka

Sida wehlisa dhammaan farsamooyinka suuxinta, waxaa jira suurto galnimada waxyeelooyin aan loo baahnayn ama dhibaatooyin la xiriira suuxinta laf-dhabarta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeelada iyo dhibaatooyinka ka yimaada suuxinta laf-dhabarka waxaa laga heli karaa degalkeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets

Dhacdooyinka ugu badan iyo waxyeelooyinka ugu badan

- **dhiig-kar hooseeya** – marka ay laf-dhabartu falgal sameyso, waxay hoos u dhigi kartaa cadaadiska dhiiggaaga. Tani waxay kaa dhigi kartaa inaad dareento suuxdin ama xanuun. Tani waxaa dareerayaal laguugu siinaayo faleembo ku xakameyn doona dhakhtarkaaga suuxinta iyadoona lagu siinaayo daawooyin si kor loogu soo qaado cadaadiska dhiiggaaga.
- **cuncun**– sida badan tani waxay dhici kartaa haddii dawooyinka-sida-moorafiin oo kale loo isticmaalo suuxinta laf-dhabarta. Haddii aad leedahay cuncun daran, dawo ayaa lagu siin karaa si ay kuu caawiso.

- **Kaadida oo adkaata (kaadi reeb) ama lumista xakameynta kaadiheysta (xakameyn la,aan)**– waxaa laga yaabaa inay kuugu adkaato inaad kaadihaystaada u faaruqiso sida caadiga ah inta laf-dhabartu shaqeyneeso ama, badanaa sida naadir ah, waxaa laga yaabaa inaad lumiso xakameynta kaadiheysta. shaqada kadiheysta waxay ku soo laaban doontaa caadi kadib marka laf-dhabartu dhamaato. Waxaa laga yaabaa inaad u baahatid in si ku meelgaar ah tuubo loo geliyo kaadi-haystaada, inta laf-dhabartu ka dhamaaneyso iyo muddo gaaban ka dambeyso. Laf-dhabartu ma saameyneysa Shaqada Mindhicirkaaga.
- **Xanuunka inta lagu jiro durista**– haddii aad xanuun ka dareento meelo aan ka ahayn meesha cirbadu ku jirto - waa inaad isla markaaba u sheegtaa dhakhtarka suuxinta. Tani waxay noqon kartaa lugahaaga ama hoos, waxaana laga yaabaa inay sabab u tahay cirbadda oo taabaneyso dareeme/xidid. Cirbaddu dib ayaa loogu celin doonaa.
- **Madax xanuunka ka dambeya dilaaca xubka laf-dhabarta**- waxaa jira waxyaabo badan oo keena madax xanuun ka gadaal qaliinka, oo ay kamid yihiin fuuqbaax, cunid la,aan iyo walwal. Madax xanuunada badankood waxaa lagu daaweyn karaa xanuun baabi,iye fudud. Sida aan badneyn, kadib laf-dhabarta waxaa suurtagal ah in uu yimaado madax-xanuun aad u daran, oo joogto ah oo loo yaqaano madax xanuunka ka dambeya dilaaca xubka laf-dhabarta, kaasoo leh daaweyn gaar u ah. Tani ayaa isku celcelis ahaan ku dhacdo 1 ka mid ah 200 e cirbadaha laf-dhabarta. Madax xanuunka wuxuu badanaa aad ugu xunyahay haddii aad fadhiisato waxaana ugu wanaagsan haddii aad jiifsato. Madax xanuunka waxaa laga yaabaa inay weheliyaan maqalka oo luma, ama maqalka oo yaraada ama beddelma.

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan madax xanuunka dambeya dilaaca muruqa ku dahaaran laf dhabarta, fadlan ka aqri warqad qoraaleedka Madax xanuunka laf dhabarta ama cirbadda muruqa ku dahaaran laf dhabarta taasoo laga heli karo degelkeena: [www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk leaflet](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk%20leaflet)

Dhibaatooyinka naadirka ah

Dhaawaca dareeme/xidid - tani waa dhibaato naadir ku ah suuxinta laf-dhabarka. Dareenka oo si ku meelgaar ah u luma, kabuubiyo iyo murqaha oo daciifa mararka qaarkood ayaa laga yaabaa inay sii jiraan maalmo yar ama xitaa toddobaadyo, laakiin badankood waqti ayay ku baaba'aan soo kabasho buuxda waa la helaa.

Dhaawaca waara ee dareemayaasha waa naadir (qiyaastii 1 ka mid ah 50,000 lafdhabarta). waxay leedahay ku dhawaad fursad isku mid ah oo u dhacaayaan sida dhibatooyinka waa weyn ee marka la yeelanaayo suuxin guud.

*Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan dhaawaca dareemayaasha fadlan ka aqri warqad qoraaleedka***Dhaawaca dareemayaasha ee la xirira laf dhabarta: ama cirbadda muruqa ku dahaaran laf dhabarta** taasoo laga heli karo degelkeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets

Su'aalaha la is weydiyo inta badan

Miyaan cuni karaa ka hor cirbad duristeyda lafdhabarta?-

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad raacdo isla xeerarka sida adigoo oo yeelanaayo suuxin guud. Tani waa sababta ay marmarka qaarkood laga marmaan utahay in lagaa beddelo cirbad durista lafdhabart loona beddelo suuxdin guud. Isbitaalka waa inuu ku siiyaa tilmaamo cadcad oo ku saabsan goorta aad joojineyso cunista iyo cabitaanka ka hor qalliinka.

Ma inaan si buuxda miir qaba u ahaadaa?

Qalliinka ka hor, adiga iyo dhakhtarkaaga suuxinta ayaa si wadajir ah u go'aansan kara hadii aad si buuxda u soo jeedeysid inta lagu jiro qalliinka ama haddii aad doorbidi lahayd in lagu suuxiyo si aadan uga warqabin hawsha oo dhan. Xadiga suuxinta badanaa waa la geen karaa halbeegga la rabo si aad uga warqabto, lakiin walaacsanaan danbe ma sii jireyso. Sido kale waa macquul in la isku daro cirbad durista lafdhabarta iyo suuxinta guud lakiin tani macnaheedu waa in ay jiraan qataraha cirbad durist lafdhabarta iyo suuxdin guud labadooduba.

Miyaan arki doonaa waxa aniga igu dhacaayo?

shaashad ayaa la dhigayaa bartamaha jirkaaga ku aadka xabadkaaga, sidaa darteeda ma arki kartid qalliinka. Qalliinnada qaarkood waxay isticmaalaan fiidiyoow kaamero iyo weyneeso loogu talagalay qalliinka gudaha. Isbitaalada qaarkood waxay bukaanada siiyaan fursad ay ku arkaan waxa shaashada ka dhacaya.

Ma leeyahay kala xulashada suuxinta?

Haa sida badan, waxay kuxirantahay qalliinka dhabta ah iyo wax kasta oo dhibaatooyin ah ee ka imaan karo cirbad durista lafdhabartaada. Dakhtarkaga suuxinta ayaa kaala hadli doona xulashooyinka.

Waxaa jira sababo aan badneyn oo sabab u ah inaad aan awood u yeelan karin, ama laga yaabo in lagugu la taliyo in aadan lahaanin, suuxinta guud. Kuwaas waxaa kamid ah:

- Dhibaatooyinka qeyri-caadiga ah qaarkood ee lafdhabartaada ama qalliin hore oo dhabarkaaga ah.
- 'Daawooyinka khafiifinta dhiigga' taas oo aan la joojin karin ama xinjirowga dhiiggaaga aan caadiga ahayn
- Caabuq maqaarka dhabarkaagga ama heerkul sare.
- xaladaha wadnaha qaarkood.

Ma diidi karaa inaan yeesho cirbadda durista lafdhabarta?

Haa. Haddi, adigo racaya wadhadalka dhakhtarkaga suuxinta, aad go'aansato inaad rabin mid ama aadan weli ku faraxsanayn qaadashada suuxinta lafdhabarta, markasta waad dhihi kartaa maya.

Wax miyaan dareemi doona aniga inta lagu wado jiro qalliinka?

Waa inaad xanuun dareemayn inta qalliinka lagu jiro laakiin nidaamyada qaarkood ayaa laga yaabaa inaad dareento cadaadis maadaama kooxda qalliinka ay shaqadooda qabanayaan.

Ma inaan usheegaa dhakhtarka suuxinta wax kasta inta qalliinka lagu jiro?

Haa, dhakhtarka suuxinta wuxuu doonayaa inuu wax ka ogaado dareen kasta ama dareenno kale ee aad dareemeyso inta lagu jiro Qalliinka; Tani waa qayb ka mid ah kormeerkooda suuxinta.

suuxinta laf-dhabar ma la midbaa suuxinta laga qaato qeebta danbe?

Maya. In kasta oo labadooduba ay ku lug leeyihiin kuduris cirbad suuxin inta u dhaxeeso lafaha laf-dhabarta, cirbaduhu waxay ushaqeyaan qaab yar oo kala duwan. Suuxinta muruqa ku dahaaran laf dhabarta, tuubada yar oo caaga ah ayaa ku haraysa dhabarkaaga inta lagu jiro qalliinka taasoo la micno ah in daawo suxineed badan la isticmaali karo markii loo baahdo.

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli kara warqad qoraaleedkeena *xanuun joojinta muruqa ku dahaaran laf dhabarta kadib qalliinka*, kaas oo laga heli karo degelkeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/leaflets-video-resources

Halkeen ka baran karaa wax badan oo ku saabsan qadashada suuxinta laf-dhabarka?

Waxaad la hadli kartaa dhakhtarkaga suuxinta ama la xiriiri kartaa rugta cafimaad ee qiimeynta hore ama waaxda suuxinta ee isbitaalkaga deegaanka.

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. Ttayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg waxaad u malayso

Wan soo dhawaynaynaa talo soo lagu hormarinaayo warqadan.

Haddii aad heyso faalo ah oo aad jeclaan laheed in aad bixiso, fadlan ku soo dir iimeeylka: patientinformation@rcoa.ac.uk

Royal College of Anaesthetists

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaaddii Shanaad, Febraayo 2020

warqadan waxaa dib loogu noqon doonaa sadex sano guddahood taariikhda daabacadda

© 2020 Royal College of Anaesthetists

warqadan loo koobisan karaa ujeeddada soo saaridda qalabka macluumaadka bukaanka, Fadlan xigo ishan asalka ah. haddii aad daneyneesid inaad u isticmaasho qayb kamid warqadan ah daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadcelinta ugu haboon lagana bixiyo astaamaha, sumadeynta iyo sawirada. Macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.